# Waxa uu Waalidku u baahan yahay inuu ka ogaado Baxsiga

What Parents Should Know About Runaways

## Gooma ayaa ilmo loo tixgeliyaa inuu baxsaday?

Ilmahu waa uu baxsaday hadii uu ka yar yahay 18 sanno uuna guriga ka tago isagoon haysan ogolaanshaha waalidka, AAN ka ka hayn in ilmahu:

- Uu guursaday AMA
- Uu haysto amar maxkamadeed oo u ogolaanaya  inuu ku noolaado meel guriga dibadiisa ah.

## Ka waran hadii uu ilmahaygu baxsado?



Waxa aad wici kartaa bilayska si aad u sameyso warbixin qof la la' yahay ah. Bilaysku waxa ay isticmaalaan xikmad ah sida ay tahay inay u raadinayaan baxsadaha.  Waxa ay qiimeeyaan waxyaabaha sida da'da ilmaha iyo xaaladooda. Hadii aad siin karto ciwaan khaas ah oo ah meesha ilmahu joogo, bilaysku halkaa ayey ilmaha ka raadin.

## Hadii bilaysku uu ilmahayga soo helo maxaa dhici markaa ka dib?

Bilaysku iyaga ayaa go'aansada sida ay xaalada u qaabilayaan. Bilaysku waxaa dhici karta inay ilmaha baxsaday ay siiyaan tigidh (sidoo kalena loo yaqaan "ganaax"). Ama bilaysku waxaa dhici karta inay digniin uun siiyaan ilmaha. Bilaysku waxay kaloo go'aansan karaan inay ilmaha guriga keenaan ama ay geeyaan meel gabaad ilmaha ah ama ay u ogolaadaan ilmahu inuu sii joogo meesha uu joogo markaa.

## Ilmahaygu ma inuu maxkamad tagaa ka dib kolka la siiyo ganaaxa baxsashada?

Hadii waalidku uu ka codsato maxkamadu inay ka dhaafto ilmaha ganaaxa baxsiga, kolkaa waxaa dhici karta inuusan u baahan inuu maxkamad aado. Hadii ganaaxa aan laga dhaafin, ilmaha iyo waalidku waa inay maxkamad tagaan.

## Maxaa ka dhici maxkamada?

Hanaanada maxkamad ee degmooyinku waa ay kala duwan yihiin. Hadii kiisku uu maxkamad aado, waxaa jiri kara dhowr dacwo dhagaysiyo ah. Maxkamadu waxa ay dhagaysan bilayska, xeer-ilaaliyaha, iyo ilmaha iyo qoyska. Maxkamada ayaan go'aansan in ilmahu uu baxsade yahay iyo in kale, iyo nooca caawimaada ah ee ilmaha iyo qoysku u baahnaan karaan.

## Caawimaad noocee ah ayuu ilmahaygu heli doonaa?

Maxkamadu waxa ay xukumi kartaa in ilmahu uu yahay ilmo "u baahan ilaalin iyo adeeg." Waxa ay amri karaa in ilmahu uu guriga joogo. Waxay kaloo amri kartaa adeegyo loo fidiyo ilmaha iyo waalidka.

Adeegyada waxaa ku jiri in ilmaha qoyska kale loo geeyo, la talin kali kali ah ama mid qoyska oo dhan ah, fasalo waalidnimada ku saabsan ama dabiib la xiriira isticmaalka maandooriyeyaasha. Xataa hadii maxkamadu aysan amrin wax adeegyo ah, qoysasku iyagaa ikhtiyaarkood u heli kara adeegyo. Maxkamadu waxay amri kartaa ilmaha inuu bixiyo ganaax ama uu sameeyo adeeg dowlad u shaqeyn ah. Ku lug yeeladka arrinta ee maxkamadu marmar wax bay caawisaa, laakiin ma jirto wax hubaal ah oo ah inay xalin karto dhibkaaga.

## Ma u baahnahay inaan qareen qabsado?

Hadii aad danyar tahay, degmaddu waxay kuu qaban **kartaa** qareenlacag la'aan si uu u matalo adiga iyo ilmahaaga. Sida uu yahay kiis walba oo maxkamadeed, labadiina adiga iyo ilmahaaguba waxa aad xaq u leedihiin inaad qareeno aad adigu leedihiin aad qabsataan, hadii aad is tiraaho waad u baahan tahay mid.

## Ka waran hadii qof kale uu ilmahayga iska xareysto ogolaanshahayga la'aantii?

Qofkaasi waxa uu noqon karaa qof "qarinaya baxsade." Waa dambi inaad ka xayuubiso waalid xaqiisa waalidnimo. Qofkaa sidoo kale waxaa lagu soo oogi karaa dambi ah gacan siin akhlaaq xummo ilmood. Bilayska inta dadka kuma soo oogaan dambi ah "qarin" aan ka ahayn in dambiyo kale iyana la gaystay.

## Waalid ahaan, maxaan sameyn kartaa si aan u caawiyo ilmahayga iyo qoyska?

- **Tag dhamaan maxkamadaha ilmahaaga,** waydiina su'aalo hadii aadan fahmin wax.



- **Qor magacyada lambarada cid walba** oo ku lug leh kiiska ilmahaaga – tusaale ahaan, hawl-wadeenka bulshada, shaqaalaha hay'ada ilaalinta ilmaha iyo kormeerayaashooda.

- **Hadii aad is leedahay waxaa dhici karta in ilmahaagu baxsado,** isku day inaad qorshayso meel amaan ah oo ay u baxsan karo. Waxaa dhici karta inaad dooni karto inaad u ogolaato in ilmahaagu qof ehel ah la joogo muddo. La socod sii in taa la yeeli karo. Wax kale oo la sameyn karaa waa gabaadyada dhallinyarada baxsata ee degmadda.

- **Isticmaal caawimaada laga fidiyo deegaankaaga.** Adiga iyo ilmahaaga waxaa dhici karta inaad ka faa'iidi kartaa adeegyada laga bixiso deegaankiina. Sida, qabatinada maandooriyeyaasha iyo la talinta qoyska, wacyi gelinta waalidka, xanaanada ilmaha, adeegyada caafimaadka miyirka, ama la talinta kali-kali ah. Adeegyada degmooyinku waa kala duwan yihiin. Si aad u hesho adeegyada deegaankaaga ka jira ka wac 2-1-1 gobolka oo dhan. Waxaad kaloo dhambaal (text) qoran ugu diri kartaa ziib koodkaaga lambarka 898-211 si aad uga hesho caawimaad deegaankaaga ama ugula hadasho khadka www.211unitedway.org/about-211/somali.

** "Waalid" waxaa loo adeegsaday warqadan xog aruurinta, waalidka, mas'uulka ama cida sharciyan haysa ilmaha.*

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**